



التاريخ: 09/04/2012 / 1433/05/17 هـ

الرقم: ب هـ 03 / 1433 هـ

**Halgan.net** بسم الله الرحمن الرحيم

Bayaanka Hay'adda Culimada Soomaaliyeed ee ku aadan xaaladda dalku marayo.

Hey'adda Culimada Soomaaliyeed, ayadoo eegaysa marxaladda adag ee uu dalku marayo iyo dhacdooyinka is-dabajooga ah oo saamaynaya mustaqbalka ummadda soomaaliyeed, islamarkaasna gudanaysa waajibka ka saaran xaqa sheegidiisa iyo u naseexaynta ummadda, waxay soosaaraysaa bayaankaan soosocdo:

1. Waxaan soo jeedinaynaa in aaya ka talinta ummadda soomaaliyeed aan lagu koobin dad faraku-tiris ah oo kaduulaya dano gaar ah iyo aragti shesheeye ayadoo laga tallab sanayo ummadda inteedii kale, laysna illowsiinayo xaqiiqada dhabta ah ee dalka ka jirta.
2. Waxaan caddaynaynaa in qabyaqoraalka dastuurku yahay mid dayacaya diinta, dalka iyo dadka Soomaaliyeed. Waxaana intiisa badan laga soo miin guuriyay dastuuro aan la jaanqaadi Karin waaqica ka jira Soomaaliya. Saas darteed waxaan uga digaynaa shacabka soomaaliyeed ee muslimka ah inay ku dagmaan ansixinta dastuurkaas.
3. Waxaan soo jeedinaynaa in dowladdu xil iska saarto ka war qabka iyo la socoshada waxa dalka dhexdiisa ka dhacaya ayna koontaroosho falalka wax lagu yeelaynayo diinta iyo anshaxa ummadda Soomaaliyeed, gaarahaan falalka ay wadaan awoodaha shisheeye ee dalka jooqa: malatari ahaan, shirkado ahaan iyo hay'ado ahaan.
4. Hey'adda Culimada waxaa soo gaaraya cabashooyin badan oo ka jira hay'adda garsoorka ee Dowlada KMG ah. Sidaas darteed waxaan dadka masuuliyiinta ah ugu baaqaynaa in la dhiso garsoor hufan oo ka shaqeeya dhaqan gelinta shareecada Islaamka taas oo dowladu horay u sheegtay in ay ku dhaqmeeyso.
5. Dowladdu waa inay wax ka qabataa ayna jooji saa meel kadhaca joogtada ah oo ay shacabka kula kacayaan Ciidamadeeda oo in badan ku xadgudbaya nafta, maalka, iyo sharafta ummadda.
6. Waxaan ku baaqeeynaa in loo tabaabushaysto, layskana kaashado sidii looga bixilahaa marxaladda adag ee dalku marayo, loona heli lahaa dowlad Soomaaliyeed oo hanata amniga iyo kala dambaynta kana shaqeysa danaha iyo maslaxadda ummadda Soomaaliyeed.
7. Waxaan soo jeedinaynaa in khilaafaatka siyaasiga iyo fikirka ah lagu xalliyo wadahalal iyo is-faham iyadoo la dhowrayo mabaadi'da iyo masaalixda dadka iyo dalka. Waxaan ugu baaqaynaa dhammaan qeybaha is-haya in ay joojiyaan dagaallada.

و بالله التوفيق

والسلام عليكم ورحمة الله وبركاته

Golaha fulinta hay'adda culimada soomaaliyeed

**Halgan.net**

